

May 27th, 2012

Baaqii Gabogabada Shirka Golaha Imaamyada Soomaalida Waqooyiga America ee Sanadka 2012ka Minneapolis, Minnesota

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

Ilaahay ayaan ku mahadinaynaa na waafajiyey guul inuu ku soo dhamaaday shirkii 11aad ee golaha imaamyada soomaalida waqooyiga America oo sanadkan lagu qabtay Masjidk Abubakar As-saddique ee magaalada Minneapolis Minnesota.

Goluhu wuxuu u dardaarmayaa jaaliyaadka muslimka ee Soomaaliyeed ee dibadda iney diintooda qabsadaan

Masaajidda iyo imaamyada iyo ducaadda iyo qof kastoo wax garad ah waxaa ilaahay hortiisa ka saaran xil dadka dibadaha ku daadsan.

Dadka waxaan ugu yeereynaa iney kusoo xirmaan maraakista iyo culimada si ay diintooda u badbaadsadaan, maraakistana xubna fir fircoon ka noqdaan.

Dacwada Islaamka iyo fidinteedu waa xil saaran qof kasta oo Muslim ah, loogana baahanyahay inuu si daacadnimo iyo hawl-karnimo ah u guto.

Muslimiinta guud ahaan waxaan ugu yeereynaa midnimo iyo iney xarigga Ilaahay wada qabsadaan si ay liibaan adduun iyo aakhiro u gaaraan.

Waxaan Muslimiinta Guud ahaan, Gaar ahaanna ummadda Soomaaliyeed uga digeynaa khatarta iyo cirib xumada ay leedahay khilaafka iyo kala qaybsanaanta, heer kasta iyo qola kastaba ha noqotee.

Ummadda Soomaaliyeed Distuurkeedu waa Shareecada Islaamka oo waqti kasta iyo meel kastaba ku habboon, liibaan iyo horumar, cizi iyo sharafna lagu gaaraayo.

Distuur kasta oo meel aan iyada ahayn laga keenayna waa halaag iyo cirib xumo Culimada Soomaaliyeed xil weyn ayaa ka saaraan diinta iyo dalka iyo badbaadintooda. Waxaana looga baahanyahay iney xilkooda si geesinimo leh u gutaan, meelna uga soo wada jeestaan ka hortagga khataraha kala duwan ee ku socda.

Ummadda Soomaaliyeed waxey u baahantahay 20 sano oo burbura ka dib, Dawlad ku dhisan shareecada islaamka, abuurta kala dambeeyn soona celisa amaanka.

Waxaan ugu yeereynaa dadka isku haya soomaaliya in ay heshiiyaan si ay u dhamaato faragelinta shisheeye iyo colaadu.

Waxaan ugu yeeraynaa dowladaha dariska ah sida Ethiopia iyo Kenya inay faraha kala baxaan arimaha dalka soomaaliya, umada Soomaaliyeedna loo daayo inay ka tashadaan danahooda.

Ururka Al-shabaab waxaan u soo jeedineeynaa in ay u soo noqdaan manhajka toosan iyo culimadadooda si looga wada shaqeeyo xaqiijinta manhajka alle, loona dabo qabto inta ka hadhay umadii Soomaaliyeed.

waxaan uga digeeynaa wiilasha,gabdhaha iyo da'yarta dibadda iyo gudaha jooga in ay ku kadsomaan dacaayadda shabaab oo aan la daadin dhiig xaaraan ah .

Waxaan sidoo kale ururka la baxay ahlu-suna wal jamaaca ugu baaqaynaa inay joojiyaan kana waan toobaan,xad gudubyada ka dhanka ah diinta iyo ehelkeeda.

Waxaan ugu dardaarmaynaa jaaliyadaha dibada in qoysku yahay laf dhabarta bulshada lana doonayo in laga ilaaliyo khilaafka iyo burburka si loo barbaariyo ubad suuban oo fayow.

ugu dambeeyn waxaan ugu baaqeeynaa doowladda mareeykanka in ay joojiso dhibaataada iyo midabtakoorka iyo dabagalka xaqdarrada ah ee lagu hayo muslimiinta mareeykanka.

Golaha Imaamyada Soomaalida ee Waqooyiga America